



# Six years later, what has become of them?

## A cohort study of Somali women and girls who participated in the Somali Girls Education Promotion programme

Rapid Research and Learning Fund, December 2022

UNIVERSITY OF PORTSMOUTH

consilient

Authors

University of Portsmouth
Kate Conroy
Tamsin Bradley
Francesca Salvi

Consilient
Brendan Peterson
Manar Zaki
Nimo Suleiman

Visual Design

Big Blue Communications Ltd.

# Qeybta soo koobida nuxurka dukumentiga

### Horudhaca

Dukumeentigani wuxuu ka kooban yahay natiijooyin muhiim ah oo ka soo baxay daraasad la sameeyay "Lix sano ka dib daraasadaa, wixii ka soo baxay?" daraasadaas oo la xiriirtay laguna sameeyay koox ka kooban haween iyo gabdho Soomaaliyeed oo ka qayb qaatay barnaamijka horumarinta waxbarashada gabdhaha Soomaaliyeed (SOMGEP). Daraasadda waxa fulisay Jaamacadda Portsmouth, waxaana ku wehlinayay daraasada jaamacada Portsmouth shirkad maxali ah oo loo yaqaano, Consilient, daraasadaa oo dhacday intii u dhaxaysay Bisha koobad iyo Sagalaad 2022. Daraasaddu waxay ahayd mid mudo dheer socotay oo lagu sameeynayey waxbarashada hablaha iyo natiijooyinka wanaagsan ee nolosha taas oo laga sameeyay Somaliland iyo Puntland, iyadoo diiradda lagu saarayay ka-qaybgalayaashii hore ama ka faai'daystayiishii hore ee SOMGEP, taaso la maalgeliyey iyada oo loo marayo Isbedelka Waxbarashada Gabdhaha ee marka la soo gaabiyo loo yaqaano (GEC). Daraasaddan waxaa loo xilsaaray oo fulisay Tetra Tech iyada oo loo sii maray Sanduuqa Cilmi-baarista iyo Waxbarashada Degdegga ah (RRLF) 2021-dii dhamaadkiisa. Soo koobidan waxay soo bandhigaysaa cinwaanada waaweyn iyo qodobada ugu muhiimsan. Wixii faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa qeybta warbixinta dhameystiran iyo lifaaqyada kale ee sharraxaadda.

### Wejigii koobaad ee GEC & Muuqaalka guud ee SOMGEP

Wejigiisii koobaad, GEC (2012 – 2017) waxuu maalgeliyey 37 mashaariic oo ka kala socdey 14 wadan, labo kamid ah waxaa ay baahitireen Somaliland, Puntland, iyo Galmudug: Qeybtii SOMGEP-ta ee diirada saareysay dadka reer miyiga taasoo ay fulisey heyada caalamiga ah ee CARE, iyo mashruucii la odhanayey EGEP (mashruuca waxbarashada gabdhaha iyo dabar gooynta gaajada oo ay fulisey heyada caalamiga ah ee Relief. Cilmi baadhistani waxeey diirada saareysa SOMGEP-tii hore, ama *Kobcinta Waxbarashada Gabdhaha.* Aragtida isbeddelka (ToC) ee SOMGEP ayaa qabtey: in la kordhiyo hablaha reer miyiga helitaankooda ku aadan waxbarashada iyo dhameystirka waxbarashada dugsi hoose/dhexe, iyo in loo fududeeyo sii gudbidooda ku aadan waxbarashada dugsiga sare, waxa ay aheyd mid laga maarmaan ahi in laga tego/la bedelo dhaqamada si loo kordhiyo in loo aqoonsado qiimaha iyo sharafta ay leedahay waxbarashada hablaha, iyo sidoo kale in wax laga qabto caqabadaha muuqda iyo kuwa aan muuqan ee ka dhex taagan qoyska, iskuulka, bulshada iyo heerarka kala duwan ee siyaasada taasoo hablaha ka hor istaageysa inay wax bartaan.

### Natiijooyinkii muhiimka ahaa ee SOMGEP

SOMGEP waxa uu gaadhay 10,145 qofood oo ah ka faaiideystayaal toos ah (hablaha) iyo 8,709 oo inamo ah. Maadaame mashruucu uu ahaa mid bulsheed, balse barnaamijku

waxaa uu noqdey mid dhaafsiisan fasalka. Tusaale ahaan, 5,345 hooyooyin ayaa ka qeybgaley koorisyada wax aqriska iyo qoraalka; 209 culimo ayaa lagu baraarujiyey waxbarashada hablaha iyo jinsiga ee islaamka dhexdiisa; 1,211 oo kamid ah gudida waxbarashada ee bulshada ayaa lagu tabobaray qorshaha horumarinta iskuulka; 315 oo hablo lagu daydo ah ayaa lagu tabobarey inay hablaha ku dhiirogeliyaan inay doorka hogaamineed qaataan, sidoo kalena ay ka qeybqaataan doorarka hogaamineed ee iskuulka; 270 macalimiin ayaa la tabobaray (oo ay ku jiraan 90 haween); 150 dugsi oo miyiga ah, dugsiyo sare ah, waxaa sidoo kale dib loo cusbooneysiiyey qalabka jiifka ee dugsi sare; iyo dib u eegista siyaasada ku aadan mawduucyada la xidhiidha sinaanta jinsiga ee ardeyda dhexdeed, shaqaaleeysiinta macalinka iyo tabobarida, hababka lagu maareeyo xogta, iyo maamulida iskuulka ayaa la qabtey.

### Dulmar ku aadan cilmi baadhista iyo hababka

Waxa ay ujeedadadeenu ahayd inaanu soo saarno caddayn ku saabsan xidhiidhka ka dhexeeya astaamaha nolosha hore ee qofku leeyahay ama sida qofka uu yahay marka uu yaryahay iyo natiijooyinka uu qofku helayo nolosha dambe, marka uu weynaado ama mustaqbalka anaga oo sample ama muunad u soo qaadanay haweenka Soomaaliyeed ee hore uga qaybqaatay qiimaynta dhexe ama dhamaadka SOMGEP (CARE, 2016; CARE, 2017). Sida darteed, waxaan si dheer u daraasenay oo aanu ula soconnay oo aan u raacnay kooxda anagoo eegnay noloshooda dambe ama mustaqbalooda ee 2022, waxaana ka ururinay xog ku saabsan sida ay u arkaan barnaamijka SOMGEP. Naqshadeynta daraasaddan waxa hagayey oo udub dhexaad u ahaa saddex su'aalood oo cilmi-baaris ah (RQs):

1. Ilaa intee in le eg ayeey astaamaha qoyseed iyo mida shaqsiyadeed ee caruurnimo saadaalinayaan natiijada nololeed ee hablaha soomaaliyeed ee ka qeybgalay SOMGEP?
2. Waa maxey saameynta fahan ee shaqsiyadeed ee ka qeybgalka barnaamijku ku yeeshay dadkii hore uga qeybgaley SOMGEP?
3. Maxeey yihiin xidhiidhka ka dhaxeeya ka qeybgalka SOMGEP iyo natiijada nololeed ee waqti xaadirkani, isbarbardhiga ku aadan ka faa'iideystayaasha SOMGEP iyo kooxda isbarbardhigga ee aan la taaban?[1]

Si aan uga jawaabno su'aalahan, waxaanu isticmaalnay cilmi baadhis ah hab isku xiga oo isku dhafan oo diiradda lagu saaray ururinta xogta aasaasiga ah taas oo leh saddex weji oo muhim ah: (i) qeyb hore oo ah qeybta xog uruurinta suaalaha furan (n=19) taas oo ka horeystay ururinta xogta muhiimka ah si aan ugu wargelinno qalabka iyo fikradda qaabka

[1] Sualahani cilmi baadhiseed waxeey keentay isticmaalka kooxaha isbarbardhiga ee haweenka aanu ka faaiideysanin mashaariicda SOMGEP, kaasi oo qoraaygu u ogolaanaya inuu daraaseeyo farqiyada u dhaxeeya haweenka ka faaiideystay SOMGEP iyo kuwa aan ka faaiideysan ee waqti xaadirkani.

daraasada (ii) isku jir qaab quantitative ah iyo mid qualitative ah (n=408) (n=40); iyo (iii) wejiga ugu dambeeya oo ah xog ururin qualitative ah (n=40) oo ku noqonaya 40-kii la wareystay wejiga labaad si loo ansixiyo (ama aanahayn) natiijooyinka muhiimka ah. Xogta waxa la ururiyay iyadoo la raacayo habraacyadayada anshaxa ee lagu heshiiyey intii u dhaxaysay May iyo Agoosto 2022.

**Xogta koowaad (aasaasiga ah):** ayaa lagu soo ururiyay xogta qoyska ee hadda (taas oo ay ku jiraan xogta guurka iyo ilmaha); qaababka socdaalka; wakaalad iyo awood-siinta; aqoonta shaqsiga ee qoraalka; aragtida SOMGEP; iyo kala duwanaanshaha jiilasha.

**Xogta labaad** waxay diiradda saartay xogta mashruuca iyo dukumeentiyada, oo ay ku jiraan SOMGEP-da jira iyo xogta khadka-dhamaadka, iyo sidoo kale suugaanta ballaaran ee waxbarashada, jinsiga, hay'adda iyo xoojinta, iyo guud ahaan xaaladda siyaasadeed iyo bulsho ee Soomaalida.

**Xaddidaadaha:** Xadidaaha waxaa ka mid ahaa: la'aanta koox ka soo horjeeda; xaddidaadda xogta ee qiimayntii hore; cabbir yar oo muunad ah; iyo caqabadaha ku jira sifaynta sababaha. Si aad u ballaadhan, in badan oo ka mid ah falanqayntayadu waxay u baahdeen malo-awaal xooggan si loo soo saaro caddaynta sababaha (dhibaatada caadiga ah ee daraasadaha indho-indheynta). Sababtoo ah habkayaga gorfaynta ayaa ku kala duwan dhammaan su'aalaha cilmi-baarista,Waxaan si dhab ah uga hadalnay xaddidaadaha bilowga qayb kasta oo natiijooyin ah iyo **lifaaqa 10aad**.

## Natiijooyinka Muhiimka ah

Hoos waxaan ku soo bandhigaynaa natiijooyinka saddex meelood oo muhiim ah: ka Qayqaadashada SOMGEP iyo isbadalka Nolosha waqti xaadirkani, Saadaalayaasha Nolosha Hore ee Natiijooyinka waqti xaadirkani (RQ1) iyo Saamaynta la isla-gartay ee SOMGEP (RQ2).

### 1. Ka qeybqaadashada SOMGEP iyo natiijooyinka nololeed ee waqti xaadirkani

Waxaan barbar dhignay natiijooyinka nolosha haweenka SOMGEP maanta iyo "koox isbarbardhigga" oo laga soo ururiyay Sahanka Caafimaadka iyo Dadweynaha (HDS), oo ah sahan ballaaran, oo heer qaran ah.[2] Waxaan falanqeyneynaa xiriirka ka dhexeeya kaqeybgalka SOMGEP iyo natiijooyinka nolosha hadda jira kuwaas oo - xaaladaha

---

[2] Si kooban odhaahda ‘haweenka SOMGEP’ waxa lagu isticmaalay warbixinta oo dhan si loo muujiyo hablaha iyo haweenka la waraystay ee sida rasmiga ah uga qaybqaatay barnaamijka SOMGEP. Waxaan sidoo kale u isticmaalnaa weedha 'kooxda isbarbardhigga' si aan u muujinno kuwa laga soo ururiyay xogta HDS oo loo tixgeliyey inay la mid yihiin haweenka SOMGEP ujeedooyin gorfayn.

qaarkood, malo-awaal xaddidan - loo tarjumi karo cabbirka saameynta barnaamijka. Falanqayntayadu waxay daaha ka qaadaysaa xidhiidh xooggan oo nidaamsan oo ka dhexeeya SOMGEP iyo dhowr natiijooyin nololeed oo haween ah.[3] Lix sano oo keliya ka dib markii barnaamijka la dhammeeyey, haweenka SOMGEP waa ay ka aqoon badan yihiin oo waa shaqeeyaan, iyo dulqaad yar oo rabshadaha guurka ah. Waxa kale oo ay ka warbixiyaan heerar awood-siineed oo weyn - oo ah qaabka korodhka awoodda ugu yaraan qaar ka mid ah go'aamada qoyska - marka loo eego dhiggooda aan SOMGEP ahayn. Natiijooyinkani waxay ku adag yihiin falanqaynta kala duwan iyo tusaalooyinka isbarbardhigga hablaha; meelaha kale, in kastoo, SOMGEP kuma xidhna kala duwanaanshaha habaysan ee natiijooyinka maanta. Natiijooyinka muhiimka ah waxaa ka mid ah:

Sanduuqa 1: ka-qaybgalka SOMGEP iyo Nolosha Dambe

1. Haweenka SOMGEP waxay aad ugu dhow yihiin inay dhammeeyeen waxbarashada dugsiga hoose iyo dhexe marka labarbardhigohaweenka kale.
2. Baahitaanka guurka aadka u degdega ah (ka yar 15 sano) wuu ka hooseeyaa haweenka SOMGEP iyo haweenka SOMGEP waxayku guursadaan da'da weyn (18.3 sano vs 16.9 sano) celcelis ahaan.
3. Haweenka SOMGEP waxay aad ugu dhow yihiin inay shaqeeyaan ama iskood u shaqeystaan.
4. Haweenka SOMGEP aad ayey ugu yartahay in ay u dulqaataan rabshadaha waxayna aad ugu dhowdahay in ay kaalin korodhsi ka qaataan qaybo ka mid ah go'aan qaadashada qoyska.
5. Haweenka SOMGEP uma badna in ay rumaystaan gudniinka Fircooniga ah ee ay dalbanayaan caqiidada Islaamka.
6. Haweenka SOMGEP waxay si joogto ah u isticmaalaan warbaahinta, waxay aad ugu dhow yihiin inay lahaadaan talefanka gacanta, waxaanay ku xidhan yihiin aaladaha lacagta mobilada marka loo eego asaagooda aan SOMGEP ahayn.

---

[3] In kasta oo dhawr jeer oo digniino ahi ay khuseeyaan habkayaga falanqaynta - oo ay ku jiraan dhibka qeexida kooxda isbarbardhigga ku habboon iyo xaqiiqda ah in sahanku dhacay qiyaastii saddex sano gudahood - waxaan raadinay inaan yareyno walaacyadan annaga oo qaadanay qaab muxaafid ah oo xad dhaaf ah dhismaha kooxda isbarbardhigga iyo in la tijaabiyo adkaanta natiijadeena iyada oo la adeegsanayo muunado iyo noocyo kala duwan. Ilaha kaliya ee eexda ee sharxi kara natiijooyinka togan ee xooggan ee halkan laga soo sheegay waxay noqon lahayd haddii haweenka SOMGEP laga soo saaro qoysaska ama bulshooyinka si nidaamsan uga wanaagsan kuwa kale xagga waxbarashada, shaqada, iyo dabeecadaha ku wajahan rabshadaha lammaane (IPV). Marka la eego meelaha fogfog gaar ahaan iyo gobollada la haybsooco ee SOMGEP laga hirgeliyey, sharraxaaddani waa mid aan macquul ahayn.

## 2. Saadaasha Nolosha Hore ee Natiijooyinka Hadda

Si aan uga jawaabno RQ1, waxaan daraasaynay xiriirka ka dhexeeya sifooyinka noloshii hore ee ka qayb qaatayaasha ay ku jiri jireen iyo natiijooyinka iyo guulahooda nololeed ee hada ee haweenka SOMGEP. Xogtayadu waxay tilmaamaysaa qaar ka mid ah natiijooyinka la filayo iyo kuwa aan la filayn ee ku saabsan saadaalinta natiijooyinka waxbarashada: hodantinimada hore, waayo-aragnimada joogtada ah ee dugsiyeedka hore ee qaan-gaarnimada, iyo helitaanka waxbarasho ee waalidiinta ayaa dhamaantood ku xiran heerarka waxbarashada maanta ee haweenka SOMGEP. Koox-hoosaadyadan isku midka ah ee haweenka - ee ka soo jeeda qoysaska saboolka ah, waalidiintuna ay ku yar yihiin taageerada waxbarashada, iyo kuwa hore u soo maray carqaladaynta waxbarashadooda - waxay sidoo kale u badan tahay inay guursadaan, taasoo keentay xiriir dhow oo ka dhexeeya guurka iyo natiijooyinka waxbarasho ee haweenka SOMGEP ee qaan-gaarnimada hore. . Hantida hore ee qoyska, sidoo kale, waa saadaalinta ugu xooggan ee saameynta haweenka keligood ah ku leeyihiin go'aan gaarista, haddana xiriirkani wuu luminayaa marka la guursado. Natiijooyinka muhiimka ah waxaa ka mid ah (**Sanduuqa 2**):

Box 2: Astaamaha hore ee Carruurnimada iyo Natiijooyinka Nolosha waqtixaadirkani

1. Xadidaadaha iyo caqabahada hore ee waxbarashada ku yimaada sida ku celcelinta ilmaha oo fasal lagu celceliyo iyo ilmaha oo ka weyn avarageka sanad dugsiyeedka ayaa la xaqiijiyay in ay keenayso sanado yar oo ah waxbarasho la dhameeyay ama la dhameystiray.
2. Guud ahaan, hantida qoyska inta lagu jiro caruurnimada ama qaan-gaarka ilmaha waxaa lala xiriirinayaa in ay dhaceyso hanashada waxbarasho muddada dheer ee mustaqbalka.
3. Waxyaabo badan oo ku xiran shakhsiyada qofka- sida xiisaha ee ay gabadhi u heyso waxbarashada ama taageerada waalidku taageerayo waxbarashada – ayaan wax xidhiidh ah la lahayn guulo waxbarashada laga gaaro mustaqbalka dambe.
4. Helitaanka waxbarasho ee uu waalidku helay ama aqoonta waxbarasho ee waalidka leeyahay waxa ay saadaalinaysaa inuu jiro korodh kaas oo ah heerarka waxbarasho ee dugsiga oo la dhammaystay, laakiin aqoontan waalidku u leeyahay ayaa ah gaar ahaan waxbarashada aabbaha.
5. Hantida qoyska uu heysto iyo taageerada waxbarashada ee waalidku siinayo ilmaha waxay yareeyaan heerka guurka, halka carqaladaynta ama hakad ku yimaada waxbarashada xilliga qaangaarka ama waxbarashada lagu jiro ay kordhiso heerka guurka.
6. Dumarka ama haweenka SOMGEP ee guursaday waxay guursadeen ayagoo oo da'da yar islmarkaana da’ahaan ka yar hooyooyinka iyo dumarka kale ee qaraabadooda ah, inkastoo ay hore u sheegeen in da’ weynaan lagu guursado ay wanaagsan tahay.
7. Go'aamada shaqsiga ee caruurnimada la gaaro ma raacdo oo saameyn weyn oo la soo sheego kuma lahan go'aamada dadka weyn qaataan.
8. Saadaasha ugu weyn uguna xoogan maanta ee dumarka aan wali aan la guursan ay leeyihiin oo ay guriga ku yeelaan karaan go’aamada guriga ayaa ah marka ay hantida

guriga iyo masaariifta carruurta ku filan yihiin, haddana marka la guursado saamayntani way baxdaa oo waa ay yaraataa.

9. Haysashada hantida kooban ee guriga ee xiliga ilmaha uu yar yahay ama caruurnimada waxay hoos u dhigtaa dulqaadka ay haweenka u dulqaadanayaan IPV, taas oo aan u aragno tallaabo lagama maarmaan ah oo loo qaadayo in uu isbadalo dhaqanka ballaaran iyo in la bedelo caadooyinka bulshada.
10. Isuqirid ama helid awood xiliga da'da yar lagu jiro ma caruurnimada waxay hoos u dhigtaa dulqaadka IPV ee mustaqbalka dambe ee nolosha.
11. Taageerada maalgelinta waxbarashada carruurta waxa ay si yar ugu xidhan tahay aragtida dumarka ay ka qabeen waxbarashada markii ay yaraayeen wax xidhiidh ahnna lama lahan waxbarashadeeda.
12. Hantidii hore ee guriga kama turjumeyso hantida guriga ee manta.

### 3. Saameynta SOMGEP dhanka aqoonta iyo kartida shakhsi ahaaneed

Ugu dambayntii, waxa aanu falanqeynay saamaynta xadhaafka ah ee barnaamijku leeyahay, anagoo ku salaynay falaqeynta saamaynta qofeed, aqooneed iyo mid kartida ah oo ay dareemeen islmarkaana ay soo tebiyeen ka qaybgalayaasha SOMGEP, kuwaas oo barnaamijka xasuustay kuna xasuustay si aragti weyn leh. Falanqaynta aan sameynay waxaa ka mid ahaa isbarbardhigga ku aadan aragtida saamaynta barnaamijka iyo arrimo kale sida arrimaha awoodsiinta iyo sare u qaaidda (oo ay ku jirto xakamaynta iyo in la kantorolo shaqada, guurka, iyo dhaqaalaha qoyska) iyo heerka shaqo ee hadda jira. Natiijooyinka muhiimka ahna waxaa lagu soo bandhigay **Box 3**.

Box 3: Saameynta kartiyeed iyo mida nafsadeed ee ka qeyb galka barnaamishka.

1. Dadka soo xusuustay SOMGEP waxa sheegeen oo ay warbixiyeen saameynta wanaagsan ee barnaamish SOMGEP uu leeyahay
2. Halka inta badan dadka xusuustay SOMGEP ay sheegeen in barnaamishka uu siisay xirfado aad u faai'do badan, kuwa la shaqaaleysiiyay ama hada shaqeeya marka si loo fiiriyo uma aysan arkeyn xirfadahan kuwo faa'iido leh ama waxa ay aaminsanayeen in barnaamijku uusan saamayn weyn oo xoog leh yeelan.
3. Haweenka la furay iyo kuwa ragooda ay dhinteen waxay sheegeen oo ay soo gudbiyeen in SOMGEP uu leeyahay qiimo aad u weyn marka la eego kalsoonida ay heleen oo korortay, iyo marka la eego qiimaha ay leeyihiin xirfadaha ay soo saareen iwm.
4. Dumarka ka soo jeeda qoysaska iyo bulshooyinka la haybsooco ayaa iskood uga warbixiyey saamaynta guud islamarkaana xoogan ee uu leeyahay barnaamishka SOMGEP.

5. Haweenka SOMGEP waxa ay u badan tahay inay iskood uga warbixiyaan oo ay maamulaan go'aan gaarista qoyska aadna waa u yartahay in ay gaaraan go'aamada la xidhiidha madaxbannaanida jidheed ama jirkooda in ay ayagu u madaxbanaan yihiin oo ay leeyihiin.
6. Haweenka ama dumarka ka faaidaystay SOMGEP maanta waxa ay leeyihiin waxbarasho iyo aqoon heersare ah, hanti iyada oo dumarka u soo guuray ama tagay magaalooyinka ay leeyihiin oo ay kasbadeen awood sare oo ah karti is-sheegiseed iyo mid ismuujineed.
7. Sare u kac ah is-sheegida ama iska warbixinta qofka ayaa korodhay taasi oo si dhexdhexaad ah ula xidhiidhaa aragtiyo dheeraad ah oo hore u socod ah oo ku saabsan IPV iyo - xad yar oo ah - Gudniinka Fircooniga ah.

### Gunaanidkii

Natiijooyinka ka soo baxay cilmi-baaristan ayaa waxa ay muujinayaan inuu jiro xiriir cad oo ka dhexeeya ka-qaybgalka barnaamishka SOMGEP iyo gaarista natiijooyin wanaagsan ee dumarka ay gaarayaan maanta. Waxaan aragnay sida ka qaybqaadashada barnaamishka uu xiriir ula leeyahay korodhka ku imaanaya helitaanka waxbarashadaa ee haweenkan, suurtagalnimo aad u weyn oo ah helitaanka fursado shaqo iyo hoos u dhac ku yimi dulqaadka loo dulqaadanayo IPV, iyo sidoo kale natiijooyin kale oo wanaagsan oo laga dhaxlay barnaamishkan kuwaas oo xaga sare ama kor lagu faahfaahiyay. Si kastaba ha ahaatee, caddayntu waxay sidoo kale tilmaamaysaa oo ay muujinaysaa saamaynta kala duwanaansho ee natiijooyinka guud iyo in aragtiyaha kala duwan, ficilada, ama caqiidada ee ku saabsan nolosha ee haweenka SOMGEP qaarkood ay qabaan in aysan qasab ahayn inay u gudbaan am ay saameyn ku yeeshaan dumarka kale. Arimaha kale ee deegaanka ama bey’ada ku saabsan, ee ka baxsan baaxadda iyo awooda GEC ama SOMGEP, ayaa sidoo kale door muhiim ah ka ciyaaray dhexdhexaadnimada natiijooyinkan maanta.

Daraasadu waxay muujinaysaa ballanqaad muhiim ah oo ku saabsan saamaynta muddada gaaban ee dhow (iyo mida laga yaabo in ay tahay mudada dheer ee fog) ee barnaamijyada sida SOMGEP oo kale ah, iyo qiimaha dawladda Boqortooyada Ingiriiska ay ugu fadhiso (His Majesty)(HMG) maalgalinta iyo kor u qaadisda waxbarashada gabdhaha.. Waqtiga ayaa sheegi doona hadii maalgashiyadan hore loo sameeyay ee lagu maalgaliyay waxbarashada gabdhaha ay isu beddelaan oo ay keeni doonaan natiijooyin wanaagsan oo mustaqbalka fog ah taas oo ay sadaalinyaan islamarkaana ay rajeynayaan qeybo badan oo ka socda aqoonyhanada islmarkaana ah suugaanta iyo labeenta waxbarashada. cilmi-baarisyo dheeraad ah oo mar dambe la sameynayo ayaa loo baahan doonaa si loo fahmo haddii ay tani jirto.

### Cilmi baadhis dheeraad ah oo macquul ah

Meelaha suurtogalka ah ee loo baahan yahay in cilmi-baaris dheeraad ah lagu sameynayo ah oo ay daraasadan aan sameynay sheegayso waxaa ka mid ah:

1. **Socoshadaa Cilmi-baadhisyo, cilmi baadhistaas oo ah hababka isku-dhafan ee muddada-dheer, ee dhammaan xaaladaha** - cilmi-baadhistani waxay soo bandhigtay qiimaha ay leedahay in loo gashto muraayado-dheer-dheer si loo cabbiro oo loo ogaado saamaynta waxbarashadu ku leedahay natiijooyinka nolosha haweenka, xitaa marka la eego xaaladaha ugu adag. Sii wadida cilmi baaristan oo loo wadayo muddo dheer laguna wadayo ka qaybgalayaasha SOMGEP waxay ay suurto galinaysaa in la helo sawir guud oo balaadhan oo ku saabsan sida waxbarashadu u sii socoto (ama aanay u sii socon) si ay uga faa'iidaysan oo ay saameyn ugu yeeshaan qaabaynta nolosha ka qaybgalayaasha. Marka loo eego xaaladaha guud, tani waxay noqon doontaa mid qiimo weyn leh.
2. **Isbeddelka ku imaanaaya jiilallka iyo saamaynta ay ku yeelanayso helitaanka waxbarasho iyo gaadhista natiijooyin ballaaran** - waxaan aragnay isbeddelka ku imanaya aragtida iyo hab-dhaqanka jiilal kasta, iyo bar bardhiga muhiimadda isogaanshaha ee kaqaybgalka barnaamijyada waxbarashada haweenka ee maanta. Cilmi baaris dheeraad ah ayaa laga yaabaa oo suurto gal in loo baahdo si loo fahmo isbadalka balaadhan ee ah isbad badalka jiilalka ee awood u siinta gabdhaha waxbarashada, sidii kor loogu kicin lahaa iyo si loo taageero, iyo 'saameynta' ay yeelanayso noloshooda marka cilmi-baarista la sameeyo
3. **Saamaynta nidaamyada waxbarasho ee isbarbar socda** - xogtu waxay muujisay in nidaamka madarasada ee barbar socda waxbarashada cilmaaniga ama maadiga ah ay isla jaanqadeen oo ay wada shaqeynayaan. Cilmi baadhista lagu sameynayo isdhexgalkan iyo wada shaqeynta labadan nidaam ee is barbar socda iyo saamaynta ay ku yeelanayaan qeybaha kale waa mid noqonaysa mid muhiim ah. Tusaale ahaan, sidee ama qaabab noocee ah ayay nidaamyadan kala duwani u kala duwanaan karaan ama ay iskaga hor iman karaan? Fahamka wanaagsan oo laga helo sida ay u ay nidaamyada kala duwan u wada jaanqaadi karaan waxa ay keeni kartaa taageerada waxbarashada gabdhaha oo noqota mid faaido leh oo miro dhal ah.
4. **Dib-u-eegis nidaamsan oo habeysan** - xogta aragtiyaha kala duwan, ee kor lagu sharraxay, waxa laga yaabaa inay farta ku fiiqdo oo ay tilmaanto baahida loo qabo in la milicsado oo dib loo eego waxa aan cabbireyno, sida aan u cabbireyno, iyo haddii wakiilladani ay yihiin kuwo ku habboon oo sax ah. Dib u eegis nidaamsan oo lagu sameeyo waxqabadyada taageerada waxbarashada ballaaran, sida la shaqaynta waalidiinta/bixiyeyaasha daryeelka, ayaa sidoo kale noqon kara mid

qiimo leh oo wanaagsan, si loo fahmo muhiimada ay leeyihiin hawlahan dheeraadka ah ee guud ahaan xaaladaha.

### Tixgelino dheeraad ah

Gabagabooyinkan iyo dhameystirkani, si kastaba ha ahaatee, waxa laga yaabaa inay caqabad dhaliyaan oo ay ku keenaan fakar dheeraad ah kuwa naqshadeyna ama fulinaya barnaamijyada waxbarashada kuna fulinaya deegaan iyo jawi adag, iyo kuwa baadhaya, qiimeeynaya, ama isticmaalaya caddayn si wax loo hagaajiyo. Isticmaalka la istimaalayo caddaynta lagu soo ururiyey cilmi baadhistan loona isticmaalayo bar bilow ah, islamarkaana ay la la socdaan qeybo ka mid ah waayo-aragnimada kooxdeena, waxaan hoos ku bixineynaa dib u eegis. Waa in la ogaadaa in halkii aanu jawaabo bixin lahayn, aan mararka qaarkood keeno su'aal kicinaysa feker dheeraad ah.

1. Wadooyinka iyo dariiqyada lagu helo xirfadaha shaqada ee ay gabdhuhu ka barteen waxbarashada iyo codsiyadoodaa shaqo ee mustaqbalka ama fursadaha ganacsi waxay u baahan yihiin in la sii habeeyo oo la beegsado, islmarkaana si cad loogu sheego hablaha ama gabdhaha hada wax baranaya.
2. Aragtiyaha iyo caqiidooyinka ku saabsan waxbarashada, sida taageerada waalidka ee waxbarashada iyo aaminsanaanta gabdhaha ay aaminsantahay qiimaha waxbarashada, ayaa laga yaabaa oo ay suurto gal tahay inay door aad u yar oo aan muhiim aheyn ka ciyaaraan guud ahaan hanashada iyo helida waxbarashada taaso ka duwan waxa ay cilmi baadhayaal badan iyo shaqaale badan oo barnaamisheed ay aaminsan yihiin.
3. Natiijooyinka kale waxay caqabad ku noqonayaa caqliga caadiga ah ee la xidhiidha isku xidhka hanashada waxbarashada waxayna muujinayayaan baahida loo qabo cilmi-baadhis dheeraad ah.
4. Barnaamijyada waxbarashada gabdhaha ee mustaqbalka waxa lagu dhisayaa qaabka SOMGEP ee fasallada wax lagu dhiganayo ka baxsan iyadoo la isticmaalayo qaabab ay ka mid yihiin dumarka da'da weyn si ay gabdhaha yar yar ay tusaale ugu noqdaan oo ay ugu daysadaan iyo in gabdhaha yar yar laga taageero wadahadallo dheeraad ah oo ay bulsho la qaadanayaan gaar ahaan ragga.
5. Hadii waxyaabo weeyn oo naxdin leh (sida abaar) ay dhacaan, taageero heer qoys oo kala duwan ayaa loo baahan yahay si loo hubiyo imaansho toosan oo dugsigu la imaanyo iyo in la ilaaliyo oo la hubiyo waxbarasho mustaqbalka fog oo aan kala joogis laheyn taas oo ay helayaan gabdhaha da'da yar.
6. Taxadar dheeraad ah ayaa loo baahan iyo in aad looga fiirsado habka, iyo sida, loola falgalayo oo loo tacaamulayo dugsiyada diinta marka la qorsheynayo ama rabo in la bixiyo barnaamijyada waxbarashada maadiga ah.
7. Marka la eego saameynta ay tignoolajiyada ku leedahay nolosha haweenka ee maanta, in la sahmiyo awoodda ay dumarka u leeyihiin adeegsiga tignoolajiyada iyo sidii qalab isgaarsiin ahaan iyo mid waxbarasho ay ugu isticmaali lahayeen tichnooligiyada ayaa manta ah arin dhab ah oo muuqata oo aan indhaha laga qarsan karin.

8. Falanqayn habaysan oo ah isku-dhafka suurtagalka ah ee dhexdhexaadiyeyaasha guud ee nolosha haweenka waxay xoojin kartaa labadaba barnaamijka iyo naqshadaynta cilmi-baarista.
9. Caddaynta iyo 'saamayntu' waxay macno samaynayaan oo keliya marka la eego xaaladaha ku xeeran, sidaa awgeed tani waxay u baahan tahay wakhti hore iyo khariidad soconaysa oo joogto ah si loo hirgeliyo barnaamijka guuleysta.

Anagoo tixgalinayna qaar ka mid ah caqabadaha caddayntu soo saartay ee ah xikmadaha iyo caadiga ah ee la xidhiidha hanashada waxbarashada, miyaynu la tacaalaynaa oo raaceynaa waxyaabaha saxda ah iyo u jeedooyinkooda saxda ah?